

Tallaabooyinka Habraaca Dheefaha Health Related Social Needs (HRSN)

1

Baaritaanka hore

Ugu yaraan 28 maalmood

Ka dib marka aad soo gudbiso codsi, wuxuu mari doonaa hubin hore. Fadlan sug ugu yaraan 28 maalmood ka hor intaadan dib u soo daba gelin ama aadan filan wicitaan lagu soo celiyo.

Khayraadka kale ee caawimada degdeg ah.

La xiriir 211 si aad u hesho khayraadka hoyga ee aaggaaga

- ▶ Wac: 2-1-1 ama 1-866-698-6155
- ▶ limayl: help@211info.org
- ▶ U qor furahaaga Zip-ka: 898211 (TXT211)
Isniinta ilaa Jimcaha, 9 subaxnimo. – 5 galabnimo.
- ▶ Booqo: 211info.org

Caawimaada loogu talagalay kireystayaasha Oregon: oregoncat.org

Caawimaada la xiriirta kharashaadka adeegyada: caporegon.org/find-help

OHP-HSO-25-7168

2

Hubinta in aad u qalanto

Ilaa 28 maalmood

Kooxda CareOregon waxay eegi doonaan codsigaaga si ay u hubiyaan inaad u qalanto. Waa ay kuu soo wici karaan si ay xog dheeraad ah kaga helaan.

3

Helitaanka warqadda go'aanka

Ilaa 2 toddobaad

Waxaad boostada ku heli doontaa warqad ku sheegaysa haddii codsigaaga la ansixiyay ama aan la ansixin. Haddii la ansixiyay, warqadda waxa ku qornaan doona adeegyada ama alaabta aad heli doonto.

Fiiro gaar ah: Warqadaan macnaheedu maaha inaad bilaabi doonto helidda adeegyada. Waxaa jiratallaabooyin kale ka hor inta aysan taasi dhicin.

Adeegga Macaamiisha ee CareOregon

971-236-2998, qadka bilaashka ah ee 800-224-4840 ama TTY 711

4

Sameynta qorshaha Daryeelka

Haddii aad hesho warqad ansixin ah, CareOregon ayaa ku soo wici doontaa si ay kaaga caawiso diyaarinta Qorshahaaga Daryeelka. Tani waxaa ku jira kala hadlida dhakhtarkaaga dookhyadaada iyo baahiyaha kale ee dheeraadka ah ee aad qabto ee aad doorbidayso.

5

Helitaanka caawimaad

Taageerada cimilada ▶
Qiyaastii 2 asbuuc

Haddii codsigaaga caawimaada cimilada, sida qaboojiyaha, la ansixiyo, CareOregon waxay dalbi doontaa qalabkaaga in lagu keeno.

Taageerada nafaqada ▶
Qiyaastii 3 asbuuc

Haddii codsigaaga taageerada nafaqaynta la ansixiyo, waxaa laguuri doonaa bixiyaha adeegga nafaqada. Waxay kula soo xiriiri doonaan si ay u habeyaan adeegyadaada. Waxay qaadan kartaa ilaa 3 asbuuc in aad taageero hesho. Haddii aad u baahantahay taageero dheeraad ah oo dhanka nafaqada ah, la xiriir 211.

Caawimaada guriyaynta ▶
Ilaa dhowr bilood

Haddii codsigaaga taageerada hoyga la ansixiyo, si dhaqso ah ayaa laguuri doonaa bixiyaha adeegga hoyga. Tani waxay qaadan kartaa dhowr bilood sabab la xiriirta baaxadda codsiyada oo aad u badan. Inta aad sugayso, fadlan sii wad bixinta lacagaha kiradaada iyo korontada iyo biyaha sida ugu wanaagsan ee aad awoodo waxaadna la xiriirtaa 211 wixii ku saabsan adeegyada kale ee guriga ee deegaankaaga kajira.

Markaad la xiriirto bixiyaha adeegga gurigaaga, waxay qaadan doontaa dhowr todobaad oo kale si loo bixiyo lacagta(gaha) kale ee kirada iyo/ama korontada iyo biyaha.

Guud ahaan, waxay qaadan kartaa dhowr bilood inta u dhexaysa helitaanka waraaqda aqbalaadda bixinta kiradaada.

Waxaad dukumiintigaan ku heli kartaa luuqadaha kale, farta waawayn, farta indhoolaha ama nooca aad rabto. Waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad hesho turjubaan. Waxaad caawimaad ka heli kartaa turjubaan daryeelka caafimaadka qaabilsan oo xirfad u leh ama shahaado u haysta. Caawimadaan waa bilaash. Wac 800-224-4840, TTY 711, ama u sheeg adeeg bixiyahaaga. Waanu aqbalnaa wicitaanada xiriirinta dadka maqalka culus.